

Tallaalka COVID-19 ee Uurka iyo Naasnuujinta

Markii ugu dambeysay ee la cusbooneysiisay - 24 Juun 2021

Somali | Af-Soomaali

Haddii aad qorsheyneyso uur

Haweenka isku dayaya inay uur yeeshaan uma baahna inay dib u dhigaan tallaalka ama ay iska ilaaliyaan inay uur yeeshaan tallaalka ka dib.

Haddii aad qorsheyneyso uur, waad qaadan kartaa tallaalka Pfizer ee COVID-19. Inaad is tallaasho ka hor inta aadan qaadin uur waxay ka dhigan tahay inay u badan tahay inaad difaac ka heysato COVID-19 inta aad uurka leedahay oo dhan. Tallaalku ma saameynayo bacriminta.

Ma jirto wax caddeynaya in haweenka uur qaada tallaalka kabacdi ay halis sare ugu jiraan inay yeeshaan dhibaatooyin saameeya uurkooda ama caafimaadka ilmahooda. Looma baahna inaad iska qaado baaritaanka uurka intaadan is tallaalin kahor.

Hadaad uur leedahay

Waxaa lagula talinayaa haweenka uurka leh inay qaataan tallaalka Pfizer COVID-19, xilli kasta oo ah inta ay uurka leeyihiin. Haddii aad uur leedahay, halista natiijooyinka daran ee ka imanaya COVID-19 aad ayey ugu sarreeysaa adiga iyo ilmahaaga aan dhalanba.

Hadaad naas nuujiso

Haddii aad naas nuujinayso, waxaad heli kartaa tallaalka Pfizer COVID-19 wakhti kasta. Uma baahnid inaad joojiso naasnuujinta kahor ama kadib tallaalkaaga.

Ma jirto wax caddeyn ah in haweenka naas nuujinaya ay ku sugan yihiin halis sii kordheysa oo ah dhibaatooyin kaga imaanaya COVID-19 marka loo eego haweenka aan naas nuujin.

Aqoonta hadda jirta ee ku saabsan tallaalka COVID-19 ee haweenka naas nuujinaya

Ma jiraan daraasado faahfaahsan oo ku saabsan tallaalka COVID-19 ee haweenka naasnuujiya. Si kastaba ha noqotee, ma jiraan wax walaac ah oo ku saabsan ammaanka haweenka naas nuujinaya amaba dhallaankooda. Caddayn hordhac ah ayaa waxay muujineysaa in unugyada difaaca jirka ee haweenka is tallaalay ay u gudbi karaan caanaha naaska ayna siin karaan xoogaa difaac ah ilmaha naaska nuugaya.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah

Haddii aad uur leedahay ama aad naas nuujinayso ama aad ka fikirayso inaad uur yeelato, waxaa lagugu dhiirigelinayaa inaad xirfadlahaaga daryeelka caafimaadka kala hadashid waqtiga tallaalkaaga.

Xigasho <https://www.health.gov.au/news/joint-statement-between-ranzcog-and-atagi-about-covid-19-vaccination-for-pregnant-women>



**COVID-19
VACCINATION**
Safe. Effective. Free.



Australian Government
Department of Health

